


Hay'adda Istaatistikada Qaranka (HIQ)



**TUSAHA SICIRKA BADEECADAHA**

**Sibteembar 2021**

## Warbixin kooban

Dhammaan qeybaha Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) bisha Sibteembar 2021 ayaa noqday 126.17, marka la barbardhigo 125.19 bishii Agoosto 2021.

Isbedel bileedka, Sibteembar 2021, marka la barbar dhigo Agoosto 2021, ayaa sare u kacay 0.73 boqolkiiba. Tan ayaa imaanaysa, marka labarbardhigo hoos u dhac bille ah oo gaaraya -1.34 boqolkiiba bishii Agoosto 2021. Sare u kac bileedka ugu badan ayaa ka yimid **guryaha, biyaha, korontada iyo gaaska** (+3.65 boqolkiiba Sibteembar). Sare u kaca guryaha, Biyaha, korontada iyo gaaska ayaa inta ugu badani ka dhalatay qiimaha kireynta guryaha (+6.43 boqolkiiba). Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid kirada guryaha (25.00 boqolkiiba) (Jaantuska 2)

Guud ahaan, sicir bararka 12kii bilood ee la soo dhaafay (Sibteembar 2020 iyo Sibteembar 2021) ayaa muujinaya in dhammaan qeybaha TSB uu sare u kacay 4.59 boqolkiiba, Marka la barbardhigo 4.24 boqolkiiba ee 12kii bilood (Agoosto 2020 iyo Agoosto 2021).

### Shaxda 1: Tusaha Sicirka Badeecadaha; Sibteembar 2021 (Dec 2014 = 100)


Tusaha Sicirka Badeecadaha, Sibteembar 2021	
Tusaha bishan (Sibteembar 2021)	126.17
Tusaha bishii hore (Agoosto 2021)	125.19
Tusaha sanadkii hore (Sibteembar 2020)	120.63
Isbedelka bilaha ah boqolkiiba %	0.73%
Isbedelka heerka sicir bararka sanadlaha ah boqolkiiba %	4.59%

### Heerka sicir bararka mar loo eego TSB-da

Isbedel bileedka ee 12 bilood

### Tixraaca TSB

Index = 100 @ December 2014



Ishaxogta: NBS

War bixin bileedka bisha **Agoosto 2021** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiiteka Agaasinka <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS\_somalia

**Guud ahaan heerka Sicir Bararka: Dhammaan Qeybaha TSB, Sibteembar 2021**

Heerka sicir-bararka bisha Sibteembar 2021 waa isbedelka boqolleyda ee Tusaha sicirka badeecadaha (TSB) ee 12kii bilood ee la soo dhaafay, Sibteembar 2020 iyo Sibteembar 2021.

**Dhammaan qeybaha TSB** ayaa sare ukacay 4.59 boqolkiiba 12kii bilood ee la soo dhaafay, Sibteembar 2020 iyo Sibteembar 2021, marka la barbardhigo 12kii bilood ee Agoosto 2020 iyo Agoosto 2021 uu ahaa 4.24 boqolkiiba.

**Dhammaan qeybaha TSB isbedelka** billaha ah ayaa sare u kacay 0.73 boqolkiiba bisha Sibteembar 2021, marka labarbardhigo hoos u dhac gaaraya -1.34 boqolkiiba bishii Agoosto 2021.

**Guud ahaan heerka sicir bararka: qeybo ka mid ah badeecadaha, Sibteembar 2021.**


Sicir bararka qeybaha **cuntada iyo cabitaanada, guryaha, biyaha, korontada iyo gaaska** ayaa ah kuwa ugu saameynta badan badeecadaha oo dhan looguna isticmaalka badan yahay dhammaan qeybaha TSB.

**Cuntada iyo Cabitaanada** ayaa qiimahooda bilaha ahi sare u kacay 0.57 boqolkiiba, inta lagu jiray bisha Sibteembar 2021 marka la barbardhigo hoos u dhac gaaraya -1.40 boqolkiiba bishii Agoosto 2021. Tani ayaa waxa ay sababtay in qaar ka mid ah cuntada qutul daruuriga ah oo qiimahoodu sare u kacay. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa kordhay 6.05 boqolkiiba Sibteembar 2021. marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah oo gaaray 5.91 boqolkiiba Agoosto 2021.

**Guryaha, Biyaha, Korontada iyo Gaaska** ayaa laga dareemay sare u kac bille ah oo gaaraya 3.65 boqolkiiba intii lagu guda jiray Sibteembar 2021, marka la barbardhigo hoos u dhac gaaraya -3.79 boqolkiiba bishii Agoosto 2021. Sare u kaca sanadlaha ah ee bisha Sibteembar 2021 ayaa gaaray 2.18 boqolkiiba

**Dhammaan qeybaha TSB-da & qeybaha la doortay**


Index = 100 @ December 2014



Ishaxogta: NBS

## A. Qeybaha ugu weyn ee isbedelka Sanadlaha ah (TSB)

Jaantuska 1: Sicir bararka sanadlaha ee dhamaan qeybaha; Agoosto 2021 (Dec 2014 = 100)



### Qeybaha ugu weyn ee sicirkoodo Kordhay (+):

- **Caafimaadka** ayaa muujiyey sicir barar sanadle ah oo gaaraya 11.02 boqolkiiba bishii Sibteembar 2021. Sare u kaca waxa sababay qiima koror ku yimid adeega Bukaanku oo gaaray (+11.36 boqolkiiba). Sare u kaca ayaa ka yimid adeega Farmashiyaasha oo noqday (+58.14 boqolkiiba).
- **Dharka iyo Kabaha** ayaa muujiyey sicir barar sanadle ah 7.56 boqolkiiba bishii Sibteembar 2021. Sare u kaca ugu weyn waxa sababay qiima koror ku yimid qiimaha dharka (+8.69 boqolkiiba). Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha dharka dumarka (+9.98 boqolkiiba).
- **Cuntada iyo Cabitaanada** ayaa sare u kacay 6.05 boqolkiiba, Sibteembar 2020 iyo Sibteembar 2021. Qiima kororka ugu badan ayaa ahaa cuntada 6.36 boqolkiiba, sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid Saliida iyo Dufinka (+48.85 boqolkiiba) iyo hilibka (+13.40 boqolkiiba).
- **Hawo bedelashada & dhaqanka** ayaa sameeysay sare u kac sanadle ah oo gaaraya 5.29 boqolkiiba Sibteembar 2021. Qiima kororka ugu badan ayaa ka yimid maqal-araga, sawirada iyo agabka lagu soo saaro warbixinada oo gaaray (+6.21 boqolkiiba). Qiima kororka ugu badan ayaa ka yimid cable TV (+11.11 boqolkiiba) iyo dhalooyinka fidsan (TV-da) +16.67 boqolkiiba.
- **Maqaayadaha iyo hoteelada** ayaa muujiyey sare u kac sanadle ah 5.05 boqolkiiba bishii Sibteembar 2021. sare u kaca ugu weyn ayaa ahaa maqaayadaha, kafateriyada iyo wixii la mid ah (+5.51 boqolkiiba).
- **Alaabaha yaryar & Adeegyada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 4.44 boqolkiiba Sibteembar 2021. Sare u kaca waxaa sababay daryeelka shakhsi ahaaneed oo qiimahoodu gaaray (+8.67 boqolkiiba). Qiima kororka ugu badan ayaa ka yimid qiimaha tima hagaajinta dumarka saaloonka iyo qurxinta Aroosyada (+12.39 boqolkiiba).
- **waxbarashada** ayaa muujiyey sicir barar Sanadle ah oo gaaraya 3.32 boqolkiiba bisha Sibteembar 2021. Sare u kaca ugu weyn ayaa ahaa qiimaha Iskuulada asaasiga iyo Dugsiga hoose (+12.45 boqolkiiba).


- **Agabka Guryaha, Qoysaska iyo Dayactirka** ayaa muujiyey sicir barar sanadle ah 3.00 boqolkiiba ee Sibteembar 2021. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid Badeecadaha iyo adeegyada qoyska si joogtada ah dayactirka ugu isticmaalo (+4.52 boqolkiiba).

#### Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu hoos u dhacay bisha Sibteembar 2021 (-)

- **Tubaakada** ayaa sicirkeeda sanadlaha ahi hoos u dhacay -19.46 boqolkiiba bishii Sibteembar 2021 marka la barbardhigo hoos u dhac sanadle ah oo gaaraya -17.65 boqolkiiba bishii Agoosto 2021. hoos u dhaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Narcotics (-27.27 boqolkiiba).

#### B. Qeybaha ugu waa weyn ee saameeya TSB -da

**Jaantuska 2: TSB; Isbedelka Sicirbararka ee bilaha dhamaan qeybaha; Sibteembar 2021 (Dec 2014 = 100)**



#### Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu kordhay Bisha Sibteembar 2021 (+)

- **Guryaha, biyaha, korontada iyo gaaska ayaa la diiwaan geliyey** sare u kac dhan 3.65 boqolkiiba Sibteembar 2021. Sare u kaca guryaha, biyaha, korontada iyo gaaska ayaa inta ugu badan ka dhalatay qiimaha kirada guryaha (+6.43 boqolkiiba).

#### Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu hoos u dhacay bisha Sibteembar 2021 (-)

- **Dharka iyo Kabaha** ayaa muujiyey hoos u dhac bille ah oo gaaraya -4.49 boqolkiiba bishii Sibteembar 2021 marka loo eego 4.70 bishii Agoosto. Hoos u dhaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha dharka (-6.97 boqolkiiba)
- **Tubaakada** ayaa sicirkeeda bilaha ahi hoos u dhacay -2.19 boqolkiiba bishii Sibteembar 2021 marka la barbardhigo -11.94 boqolkiiba bishii Agoosto 2021. hoos u dhaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Narcotics (-27.27 boqolkiiba).

**Shaxda 2: Isbedelka tusaha sicirka ee qeybaha badeecadaha Sibteembar 2021 ee habka (COICOP)**

Habka kalasaarida caalamiga ee COICOP	TSB Weight	Sibteembar 2020 TSB	Agoosto 2021 TSB	Sibteembar 2021 TSB	% Boqolkiiba Bishan iyo Bishii hore	% Boqolkiiba Isbedelka Sanadkii Hore iyo Sanadkaan
<b>Dhamaan qeybaha TSB</b>	100.00	120.63	125.26	126.17	0.73	4.59
Cuntada & Cabitaanada caadiga ah	46.04	120.85	127.43	128.16	0.57	6.05
Tubaakadda	1.25	137.35	113.10	110.62	-2.19	-19.46
Dharka & Kabaha	5.03	144.66	162.91	155.60	-4.49	7.56
Guryaha, Biyaha, Korontada & Gaaska	23.41	115.96	114.32	118.49	3.65	2.18
Agabka Guryaha	2.93	110.24	113.55	113.55	0.00	3.00
Caafimaadka	5.00	145.16	161.16	161.16	0.00	11.02
Gaadiidka	3.77	112.00	110.54	110.54	0.00	-1.30
Isgaarsiinta	2.80	101.31	103.03	103.03	0.00	1.70
Hawo bedelehshada & dhaqanka	1.00	98.54	103.75	103.75	0.00	5.29
Tacliinta	4.00	106.27	109.80	109.80	0.00	3.32
Maqaayadaha & Hoteelada	2.00	136.61	143.51	143.51	0.00	5.05
Alaabaha yaryar & Adeegyada	2.77	120.35	125.69	125.69	0.00	4.44

**Ogeysiis:**

Tusaha Sicirka Badeecadaha waa sahan ku saabsan badeecadaha iyo adeegyada ay isticmaalaan qoysaska caadiga ah. Xogta sahanka waxaa la soo ururiyaa Todobaadka koowaad iyo kan sedexaad ee bilkasta. Sicirka badeecadaha iyo adeegyada waxaa laga soo ururiyaa goobaha ganacsiga ee afarta suuq ee ugu waa weyn Magaaladda Muqdisho.


**Soosaarida tan xigta**

Tixraaca Sicirka Badeecadaha (TSB), Octoobar 2021 waxaa la baahin doonaa 15 Nofeembar 2021. Wixii faahfaahin intaasi dheer ee ku saabsan (TSB) iyo xogaha kale ee rasmiga kala soco Xafiiska Istaatistiskada, Fadlan booqo Bogeena rasmiga ah ee <http://www.nbs.gov.so>

**Lifaaqa 1aad: Dhammaan Qeybaha 'TBS' – qeybaha ka qeyb qaata heerka sicir-bararka bishii Agoosto 2021 marka loo eego COICOPka**

**Dhamaan qeybaha TSB-da**

Qeybaha ka qeybqata (%) heerka sicir bararka ( COICOP)



Isha xogta: NBS

**Lifaaqa 1aad** wuxuu bixiyaa falanqeyn kusaabsan heerka sicir bararka ee Bisha oo loo qeybiyey iyo is barbardhiga qeybaha, ayada oo loo eegayo qeybaha COICOP loona soo bandhigayo sida ay u kalasaameyn badan yihiin (ka qeyb qaadashadsooda) dhamaan qeybahaha 'TSB ka.

War bixin bileedka bisha **Sibteembar 2021** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS\_somalia